

# Codsiga Kaashka, Gargaarka Cuntada (Food Stamp), iyo Gargaarka Caafimaadka (Medical Assistance)


Ohio Department of Job and Family Services (Wasaaradda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska ee Ohio)

Isticmaalka Xafiiska Kaliya – Waxa lagu siin doonaa taariikhda iyo wakhtiga ballanta ka dib marka aad buuxisid codsigan soo socda.

Taariikhda Ballanta: \_\_\_\_\_

Wakhtiga Ballanta: \_\_\_\_\_

## Sidee baan ku codsada gargaar?



### Waxa aad u baahan doontaa:

1. Buuxi codsigan.
2. Sii codsigan Xafiiska Degmada ee Wasaaradda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska (County Department of Job and Family Services) (CDJFS).
3. Ka qaybgal wareysi ah fool-ka-fool ama qof ahaan lagula yeesho, annaga oo kuu sheegna inaad u baahnayn mooyaane.
4. Keen cadeynta loo rabo barnaamijyada aad codsanaysid. Cadeynta waxa lagu macneeyay bogga soo socda.

## Ma u baahan tahay gargaar marka aad buuxinaysid codsigan?



1. **Haddii Ingiriisigu aanu ahayn afkaaga koobaad:** Xafiiska CDJFS ayaa ku siin doona qof kaa caawin kara fahamka su'aalaha ku yaala codsigan wakhtiga wareysiga.
2. **Haddii aad qabtid naafo, aad maqalka ama aragga wax ka qabtid:** Waxa aanu kaa caawin doonaa buuxinta codsigan iyo wareysiga.
3. **Waxa kale oo aanu ku caawin doonaa wakhtiyada kale, sida:** Marka aad soo sheegtid isbeddelada, ama marka aad qabtid su'aalo ku saabsan arrintaada.

## Sidee baan ku buuxiyaa codsigan?



1. **Buuxi codsigan:** Su'aalaha ku yaala codsiga ka jawaab intii aad kari kartid. Waxa aad xaq u leedahay inaad codsatid gargaar ama kaalmo maalinta aad la soo xidhiidhid xafiiska CDJFS ee degmadaada.
2. **Haddii aanad buuxin karin codsigan maanta:** Ku buuxi magacaaga, adreskaaga, iyo saxaaxaaga bogga koobaad ka dibna sii xafiiska CDJFS ee degmadaada si ay suurogal noogu noqoto inaanu gargaar bixino maanta haddii uu kuu banaan yahay. Inta ka hadhsan codsiga guriga ayaad ku soo buuxin kartaa ka dibna waxa aad u soo celin kartaa xafiiskaaga CDJFS.
3. **Codsi u-sameynta qof kale:** Waxa aad dooran kartaa qof kale oo adiga kuu codsada gargaarka. Waxa qofkaa la yidhaahdaa wakiil amar haysta. Haddii aad qof kale codsi u sameynaysid, uga jawaab su'aalaha sida ay qofka kale u khuseeyaan.

## Halkee baan geeyaa codsigan?



1. **U gee codsigan xafiiska CDJFS ee degmadaada:** Xafiisyadayadu waxay leeyihiin saacado fiidkii ah iyo/ama ah Sabtida iyo Axadda. Taasi waxay bilaabi doontaa habka codsiga ee dhamaan barnaamijyada gargaarka.

## Sidee baan uga qaybgalaa wareysi ah fool-ka-fool?



1. **U kaalay wareysigaaga:** Inta lagu jiro wareysiga, waxa aanu dhameystiri doonaa inta ka hadhsan habka codsiga. Waxa kale oo aanu kuu sheegi doonaa nooca gargaarka laga yaabo inaad heshid.
2. **Haddii aanad u iman karin wareysigaaga:** Waa inaad la xidhiidh xafiisk CDJFS ee degmadaada oo aad ballan kale u sameysatid wareysigaaga. Haddii aanad nala soo xidhiidhin gudaha 30 cisho laga bilaabo taariikhda aad buuxisid codsigan, waxa aanu kuu diidi karnaa gargaarka waxana lagaa rabi doonaa inaad dib u codsatid. Waxa laga yaabaa inaan lagaa rabin inaad u timaadid wareysi haddii aanu go'aan ku gaadhno inay ku hayso xaalad dhibaato leh sida jiro ama gaadiid la'aan.

-- Fadlan boggan u hayso kayd ahaan. --

## Waa maxay nooca cadeyn ee aan u baahan ahay?

Shaxanka ama tusaha hoos ku yaala waxa uu taxayaa waxyaabaha loo rabo barnaamij kasta oo aad codsatid. Xafiiska CDJFS ee degmadaada kala xidhiidh tusaalooyinka dukumentiyada aad u isticmaali kartid cadeyn. Haddii aanad keeni karin wax kasta, iska kaalay wareysiga waana aanu ku caawin doonaa.

- Haddii aanad ahayn muwaadin Maraykan oo aad codsanaysid gargaarka caafimaad ee degdegga ah ee ajanabiga (alien emergency medical assistance), lagaama rabo inaad cadeysid xaaladdaada muwaadin ama xaaladdaada socdaan ama inaad keentid lambar sugid (social security number).
- Waxa laga yaabaa in qadarkaaga gargaarka cuntada (food stamp) uu kordho haddii aad keentid cadeynta kharashyadan soo socda: daryeel ilmo/qof aad masuul ka tahay, taageero ama masruuf ilmo aad ka bixisay ilmo aan kula nooleyn, kharash guri, kharashka adeegyada guriga sida korontada, kharashyada caafimaad ee dad leh naafo oo ka weyn da' da 60 (oo ay ku jiraan dawooyinka dhakhtar soo qoray).

	Gargaarka Kaashka	Gargaarka Cuntada (Food Stamp)	Gargaarka Caafimaadka (Medical Assistance) Qoysaska iyo caruurta	Gargaarka Caafimaadka (Medical Assistance) Qof gaboobay, indhoole ama naafo
Cadeyn inaad codsatay Lambarka Sugidda Bulshada (Social Security Number) (haddii aanad imminkaba mid haysan)	✓	✓	✓	✓
Kaadhka Daganaanshaha ee Ajanabiga (Resident Alien Card) ama dukumentiyada INS oo kale haddii aanad ahayn muwaadin Maraykan	✓	✓	✓	✓
Cadeynta jinsiyadda Maraykanka, haddii aad Maraykan tahay			✓	✓
Cadeynta dakhli ama lacag kale oo kasta oo soo gasha qoyskaaga (sida dabada jeegga mushaharka, diiwaanka ama waraaqaha cashuurta, waraaqaha siinta, taageerada ama masruufka ilmaha)	✓	✓	✓	✓
Qoraalada ama warbixintii ugu dambaysay ee xisaabaadka bangiga (sida xisaab jeeg (checking), urur amaah (credit union), dhigaal (savings))	✓			✓
Cadeynta lahaanshaha baabuurta (sida baabuur yar, baabuur weyn, mootooyin, doonyo, baabuurta raaxada)				✓
Cadeynta qiimaha imminka ee maalgashiga (stocks/bonds), shahaadooyinka dhigaalka (certificates of deposit), caymiska nololaha, maal lagu hayo (trusts), kaalmada lacageed ee qofka la siiyo inta u noolyahay	✓			✓
Cadeynta aqoonsiga	✓	✓		
Cadeynta wixii ah kharashka daryeelka ilmo/qof aad masuul ka tahay	✓	✓	✓	
Cadeynta taageero ama masruuf ilmo oo aad ka bixisay caruur aan kula nooleyn	✓	✓	✓	
Cadeynta wixii ah kharash guri iyo adeegyada guriga sida korontada		✓		
Cadeynta wixii ah kharash caafimaad oo ka imanaya dadka leh naafo ama dadka ka weyn 60 (oo ay ku jiraan dawooyinka dhakhtarku qoray)		✓		✓

## Goorma ayaan heli doonaa gargaar?



**Gargaarka kaashka iyo cuntada:** Waxa aanu u-banaanaanta kaashka iyo/ama cuntada (food stamp) ku saleynaa taariikhda aanu helno codsigaaga leh saxeex iyo taariikh. U-banaanaantaada barnaamijyadaa waxa go'aan laga soo gaadhaa gudaha 30 maalmood laga bilaabo taariikhda aanu helno codsigaaga saxeexan ee taariikheysan.

**Gargaarka Caafimaadka (Medical assistance):** Waxa aanu u-banaanaanta gargaarka caafimaadka ku saleynaa taariikhda aanu helno codsigaaga leh saxeex iyo taariikh. Waa in u-banaanaantaada go'aan laga gaadho gudaha 30 maalmood haddii aanad codsanaynin gargaar naafo. Haddii aad codsanaysid gargaar naafo, waa in u-banaanaantaada go'aan laga gaadho gudaha 90 maalmood. Waxa kale oo aanu ka fiirsan doonaa gargaar caafimaad oo aad heshid 3-ka bilood ee ka horeeya bisha aanu helno codsigaaga.

**Ka waran haddii aan degdeg cunto ugu baahan ahay?**



**Haddii aad degdeg cunto (food stamp) ugu baahan tahay, oo aanad imminka qaadan:** Ka jawaab su'aalaha ku yaala boggaga kow iyo laba ee codsiga. Waxa laga yaabaa in gargaarka cuntadu kuugu banaanaado si dhakhso ah oo ah gudaha 24 saacadood ilaa 7 maalmood.

**Ma waxa la rabaa inaan ahaado muwaadin?**



**Maya.** Fadlan ha ka biqin Adeegyada Muwaadinnimada iyo Imigarayshanka ee Maraykanka (U.S. Citizenship and Immigration Services) (USCIS) inay kaa horjoogsadaan raadsashada gargaarka qoyskaagu u baahan yahay. Soo-guuraa ama soo-galeeti badan ayaa heli kara kaash, gargaar cunto (food stamp), iyo gargaar caafimaad. Mida kale, gargaarka caafimaadka ee degdegga ah ee ajanabiga ayaa la heli kara iyada oo aan la fiirinaynin xaaladda sharciga aad wadanka ku joogtid.

**Maxaa ay yihiin adeegyada kale ee heli karo?**



**Waxa laga yaabaa inuu kuu banaan yahay helitaanka adeegyo kale sida:** Gargaar sii-hayn ilmo, daryeelka ka horeeya umusha, kharashyo guri, farsamooyin shaqo, iyo gargaar lagaa siiyo helista shaqo. Waxa laga yaabaa in adeegyadaasi u baahan yihiin codsi gaar ah. Weydii shaqaalaha ku qaabilsan (caseworker) warka adeegyadaa. Haddii aad u baahan tahay gargaar ah kharashka sii-haynta ilmaha, codsiga sii-hayn ilmo kala xidhiidh xafiiska CDJFS ee degmadaada.

**-- Fadlan boggan u hayso kayd ahaan. --**

# Codsiga Kaashka, Gargaarka Cuntada (Food Stamp), iyo Gargaarka Caafimaadka (Medical Assistance)

Ohio Department of Job and Family Services (Wasaaradda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska ee Ohio)

## 1. Naftaada wax nooga sheeg (codsadaha)

Qaybtan naftaada u buuxi ama u buuxi qofka aad codsiga u sameynaysid.

Magaca Hore, Xarafka Koobaad ee Magaca Dhexe

Magaca Dambe

**Miyaad tahay qof: Ma u baahan tahay mid ka mid ah adeegyadan soo socda?**

Aragga wax ka qaba

Turjubaan

Wax Kale:

Maqalka wax ka qaba

Af Calaamadeed

**Isticmaalka Xafiiska Kaliya**

Taariikhda la Helay: \_\_\_\_\_

Lambarka Codsiga: \_\_\_\_\_

Lambarka Arrinta: \_\_\_\_\_

Dedejinta Gargaarka Cuntada:  Haa  Maya

Codsiga PRC:  Haa  Maya

Codsiga Sii-haynta Ilmaha  Haa  Maya

**Marna ma dhacday in adiga, ama qof kula nool, uu qaatay kaash, gargaarka cuntada, ama gargaarka caafimaadka?**  Haa  Maya

Haddii ay haa tahay, kuma/tuma: \_\_\_\_\_ Halkee (Magaalo/Degmo/Gobol): \_\_\_\_\_

## 2. Noo sheeg sida laguula soo xidhiidhi karo

U buuxi qaybtan naftaada ama qofka aad u codsanaysid.

Adreeska Jidka  Halkan sax saar haddii aanad hoy lahayn

Magaalo

Degmo

Gobol

Fure (Zip)

Lambar Teleefon

Lambar Teleefon oo Dheeraad ah

Adrees Iimayl ah

( )

( )

**Adreeska Waraaqaha Laguugu Soo Diro (hadduu ka duwan yahay ka kore):**

Adreeska Jidka

Magaalo

Degmo

Gobol

Fure (Zip)

## 3. Noo sheeg haddii aad tahay wakiil amar haysta

Wakiil amar haysta waa qof gargaar siiya codsadaha isaga oo u buuxinaya codsiga. Haddii aad foomkan buuxinaysid adiga oo ah wakiil amar haysta, fadlan buuxi meelahan soo socda.

Magaca Hore, Xarafka Koobaad ee Magaca Dhexe

Magaca Dambe

Adreeska Jidka

Magaalo

Degmo

Gobol

Fure (Zip)

Lambar Teleefon

Lambar Teleefon oo Dheeraad ah

Adrees Iimayl ah

( )

( )

## 4. Halkan Saxeex

Saxeexa Codsadaha ama Wakiil Amar Haysta

Magaca oo ah Xuruuf Kala Go'an

Taariikh

## 5. Noo sheeg haddii aad gargaarka cuntada degdeg ugu baahan tahay

Su'aalahani waxay naga caawin doonaan inaan go'aan ka gaadhno haddii ay kuu banaan tahay inaad gargaarka cuntada ku heshid gudaha 24 saacadood ilaa 7 maalmood.

Immisa qof ayaa kula nool oo kula soo iibsada, kula karsada, oo kula cuna cuntada? \_\_\_\_\_

Uga jawaab su'aalaha soo socda kaliya dadka wax kula soo iibsada, kula karsada, ee kula cuna cuntada.

Isku-darka dhakhligaaga guud ka hor cashuuraha ama intaan cashuuraha laga jarin bishan imminka lagu jiro ma ka yar yahay \$150?  Haa  Maya

Eber ma noqday bishan imminka lagu jiro isku-darka lacagta kuu soo hadhay ka dib cashuuraha iyo ka dib marka aad bixisid waxyaabaha ay ka mid yihiin kharashka guriga, kharashka sii-haynta ilmo/qof aad masuul ka tahay, ama masruufka ilmaha ee aad bixisid?  Haa  Maya

Ma ka yar yihiin \$100 isku-darka maalkaaga ah kaash, ku jira xisaab jeeg ah (checking), ama xisaab dhigaal ah (savings)?  Haa  Maya

Kharashka kirada bishii ee gurigaaga iyo adeegyada guriga (sida gaasta, korontada, biyaha, iyo teleefonka) ma ka badan yihiin isku-darka dakhligaaga guud ka hor cashuuraha?  Haa  Maya

Ma tahay soo-guuraa ama shaqaale beereed xilliyada qaarkood shaqeeya?  Haa  Maya

## 6. Wax nooga sheeg dadka jooga gurigaaga

Waa inaad qortid qof kasta oo kula nool xiitaa haddii aanay wax codsanaynin. Fadlan u hubso inaad ugu horeysiisid magacaaga. Haddii aad u baahan tahay meel dheeraad ah oo aad wax ku qortid, soo raaci warqad gooni ah oo dheeraad ah.

- **Lambarka Sugidda (Social Security Number):** Waxa kaliya ee lagaa rabaa inaad qortid lambarka sugidda (social security number) ee qofka codsanaya kaashka, gargaarka cuntada (food stamp), ama gargaar caafimaad. Lagaama rabo inaad qortid lambarka sugidda ee qof codsanaya gargaarka caafimaadka ee degdegga ah ee ajanabiga (alien emergency medical assistance).
- **Muwaadin Maraykan:** Waxa kaliya ee lagaa rabaa inaad sheegtid in qofku yahay muwaadin Maraykan haddii qofkaasi uu codsanayo kaash, gargaarka cuntada, ama gargaarka caafimaadka.
- **Cayn (lab iyo dhedig):** Haddii qoyskaagu u codsanayo kaliya gargaarka cuntada, lagaama rabo inaad ka jawaabtid su'aasha ku saabsan caynka (lab iyo dhedig).
- **Sinji/Qowmiyad:** Qaybta 'Title VI' ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ee 1964 (Civil Rights Act of 1964) ayaa noo oggalaanaysa inaanu ku weydiino war ku saabsan sinjiga/qowmiyadda (Hisbaanig ama Laatiino). Haddii aanad doonaynin inaad na siisid warkaa, wax dhib ah uma geysan doonto arrintaada. Haddii aanad na siinin warkaa, shaqaalaha ayaa jawaab meesha galin doona.

Magac (Hore, Dambe)	Waxa Adiga Isu Tihiin (nin/xaas, inan, saaxiib, iwm.)	Lambarka Sugidda (Social Security Number)	Taariikh Dhalasho	Cayn Lab ama Dhedig	Muwaadin Maraykan Qor Haa ama Maya	Sinji	Hisbaanig ama Laatiino Qor Haa ama Maya
	Naftaada						

Maad guursatay?  Haa  Maya Magaca Lamaanahaaga \_\_\_\_\_

**Adiga, ama qof aad codsi u sameynaysid, uur ma leeyahay?** Ka jawaab kaliya haddii aad codsanaysid kaash ama gargaarka caafimaadka.

Haa  Maya Haddii ay haa tahay, tuma?

**Adiga, ama qof aad codsi u sameynaysid, ma u baahan yahay guri daryeel waayeel / daryeel guriga dhexdiisa ah?**

Haa  Maya Haddii ay haa tahay, kuma/tuma?

**Waa maxay afka aad jeceshahay?**

Hadalka \_\_\_\_\_ Qoraalka \_\_\_\_\_

**Ma jiraa qof da'diisu tahay 60 ama ka weyn?**  Haa  Maya

Haddii ay haa tahay, ka jawaab su'aalaha ku yaala qaybtan. Haddii ay maya tahay, fadlan u bood su'aasha 7.

**Qofkani ma qaataa gargaarka ama kaalmada naafada (disability benefits)?**  Haa  Maya

Haddii ay haa tahay, halkii buu ka qaataa? \_\_\_\_\_

**Qofkan suurogal uma aha miyaa inuu diyaarsado cuntada sababta oo ah naafo?**  Haa  Maya

**Haddii aad kaga jawaabtay "Haa" saddexdii su'aalood ee ugu dambeeyay, qofkaasi ma doonayaa inuu qaato gargaarka cuntada (food stamp) oo gooni ka ah dadka kale ee aad la nooshahay?**  Haa  Maya

## 7. Wax noog sheeg dhaqaalahaaga

**Adiga ama dadka dagan gurigaaga bishan ma heli doonaan dakhli?**  Haa  Maya

Dakhliga waxa loola jeedaa dhamaan lacagta adiga iyo dadka kale ee jooga gurigaaga ay helaan sida lacag laga shaqeystay shaqo, taageerada ama masruufka ilmaha/xaaska ama ninka, gargaarka naafada (disability benefits), gargaarka hawlgabka (retirement benefits), Magdhowga Shaqaalaha (Workers' Compensation), Social Security, SSI, Gargaarka Sooyaalka Ciidanka (Veterans Benefits), iwm.

**Haddii ay haa tahay, fadlan buuxi shaxanka ama tusaha hoose.**

Magac	Nooca Dakhliga	Qadarka Dakhliga (ka hor cashuuraha)	Inta Jeer ee la Helo (todobaadle, labada todobaad kasta, iwm)	Taariikhdii Ugu Dambeysay ee la Helay

**Immisa ayaa adiga iyo dadka jooga gurigaaga ay ka haystaan lacag kaash ah, ku jirta xisaab jeeg (checking), ama xisaab dhigaal ah (savings) (oo ku jirta xisaabo bangji, kaalmada lacageed ee qofka la siiyo inta u noolyahay maalgalin (stocks, bonds)?**

Sheeg isku-darka qiyaasta ugu fiican ee aad bixin kartid: \$

**Ma jira qof gurigaaga jooga oo shaqo ka tagay ama shaqo laga eryay gudaha 60-kii maalmood ee ugu dambeeyay?**  Haa  Maya

Haddii ay haa tahay, kuma/tuma? \_\_\_\_\_ Goorma? \_\_\_\_\_ Maxay sababtu ahayd?

**Ma jiraa qof jooga gurigaaga oo shaqo-ka-fadhiisi kaga jira shaqo?**  Haa  Maya

Haddii ay haa tahay, kuma/tuma? \_\_\_\_\_

## 8. Wax nooga sheeg kharashkaaga

Waa kuwee kharashka adiga iyo dadka jooga gurigaaga aad bixisaan? Sax saar dhamaan inta haboon. Qor qadarka uu yahay kharash kasta.

**Kharaska sii-haynta ilmo ama qof kale oo aad masuul ka tahay**

Qadarka la bixiyo bishii oo la xisaabiyay: \$ \_\_\_\_\_

Haddii aad u baahan tahay gargaar lagaa siiyo kharashka sii-haynta ilmaha, la xidhiidh xafiiska CDJF ee degmadaaga si aad u sameysatid codsi sii-hayn ilmo.

**Lacagta loo Bixiyo Masruufka Ilmaha**

Qadarka la bixiyo bishii oo la xisaabiyay: \$ \_\_\_\_\_

**Kharashka caafimaadka qof kasta oo ah nafo ama jira 60 ama ka weyn**

Waxa kuwaa ku jira kharashyada sida kharashka caafimaadka, dawooyinka dhakhtarku soo qoro, qayb-bixinta caymiska caafimaadka (premium), ama adeegyada kale ee caafimaadka.

Qadarka la bixiyo bishii oo la xisaabiyay: \$ \_\_\_\_\_

**Bixinta Kirada/Daynta Guriga**

Qadarka la bixiyo bishii oo la xisaabiyay: \$ \_\_\_\_\_

**Adeegyada Gurida** -Sheeg qadarka laga bixiyo bishii adeeg kasta oo la xisaabiyay.

**Ma bixisay kharashka kululeynta guriga iyo/ama hawo qaboojinta guriga?**

Haa  Maya

Gaas \$ \_\_\_\_\_  
 Teleefon \$ \_\_\_\_\_  
 Qashin \$ \_\_\_\_\_

Koronto \$ \_\_\_\_\_  
 Biyo \$ \_\_\_\_\_  
 Bulaacad \$ \_\_\_\_\_  
 Wax kale \$ \_\_\_\_\_

## 9. Saxeexa qofka buuxiyay codsigan

**Marka aan saxeexo codsigan:**

- Waan fahmay su'aalaha ku yaala foomkan waxana aan cadeynayaa, iyada oo la igu qaadi karo ciqaab been-sheegid, in dhamaan su'aalahaygu sax yihiin oo ay dhameystiran yihiin intaa aan karaankay ka warqabo, taasoo uu ku jiro warka ku saabsan muwaadinnimada iyo xaalada ajanabi ee qof kasta oo ka tirsan qoyska oo codsanaya gargaarka.
- Aniga oo og ganaaxa ka iman kara beenta ayaan sheegay dhammaan kaalmooyinka iyo lacagaha kale ee la midka ah ee aan aniga iyo / ama lammaanahaygu ay faa'iidadu noogu jirto.
- Waan fahmay waanan oggalaahay inaan keeno dukumenti si aan u xaqiijiyo waxa aan sheegay.
- Waan fahmay waanan oggalaahay in CDJFS uu la xidhiidhi karo dad ama hay'ado kale si loo helo xaqiijinta loo baahan yahay ee ku saabsan u-banaanaantayda iyo heerka gargaarka.
- Waxa aan fahmay marka aan saxeexo codsigan ee aan helo gargaarka dawladda ee OWF, inaan ku wareejinayo Gobolka Ohio xuquuqda dhamaan taageerada ama masruufka ee la rabo in la siiyo aniga iyo caruurta aan qaangaadhka ahayn ee ku jirta kooxda gargaarka.
- Waxa aan fahmay in marmarka qaarkood, la i weydiin karo inaan oggalaansho siiyo CDJFS si ay u sameeyan wixii ah la-xidhiidhis lagama-maarmaan u ah go'aaminta u-banaanaantayda.

Saxeexa Codsadaha ama Wakiilka Amarka Haysta	Haddii Aad Tahay Wakiil Amar Haysta, Sheeg Waxa Isu Tihiin Codsadaha	Taariikh

## 10. Waxa la sameeyo marka aad buuxisid codsigan



U soo celi codsigan xafiiska 'County Department of Job and Family Services' ee degmadaada.

### Xuquuqdaada Madaniga ah

Xeerka Federalka iyo siyaadaha Wasaaradda Beeraha ee Maraykanak (U.S. Department of Agriculture) (USDA), Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka (U.S. Department of Health and Human Services) (HHS), Wasaaradda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska ee Ohio (Ohio Department of Job and Family Services) (ODJFS) iyo Qaybta Degmada ee Wasaaradda Shaqada iyo adeegyada Qoyska (County Department of Job & Family Services) (CDJFS) waxay sheegayaan in aanaanu sameynin takooris ku saleysan sinji, midab, asal wadan, lab iyo dhedig, da', ama naafo. Marka la eego siyaasadda Xeerka Gargaarka Cuntada (Food Stamp Act) iyo ta USDA, waxa la mamnuucay takoorista ku saleysan diin ama ra'yi siyaasadeed.

Si aad u codsatid dacwad ah takooris, warqad u soo dir ama soo wac USDA, HHS, ama ODJFS.

#### U Soo Qor ama Soo Wac:

##### USDA

Director, Office of Civil Rights  
Room 326-W, Whitten Building  
1400 Independence Avenue, S.W.  
Washington, D.C. 20250-9410  
(202) 720-5964 (cod iyoTDD)

#### U Soo Qor ama Soo Wac:

##### HHS

Region V, Office of Civil Rights  
233 N. Michigan Ave., Suite 240  
Chicago, Illinois 60601  
(312)886-2359 (voice)  
(312) 353-5693 (TDD)  
(312)886-1807 (fax)

#### U Soo Qor ama Soo Wac:

##### ODJFS

Bureau of Civil Rights  
150 E. Gay Street, 18<sup>th</sup> Floor  
Columbus, OH 43215  
(614) 644-2703 (cod)  
1-866-227-6353 (wicis bilaash ah)  
(614) 752-6381 (faakis)  
1-866-221-6700 (TTY)

USDA, HHS, iyo ODJFS waa bixiyeyaal fursado iyo shaqo loo siman yahay.